

Si taxaddar leh u akhri hagahan dhammaantiis ka hor intaadan bilaabin baaritaanka.
Baaritaankan wuu ka duwanaa karaa kuwa aad hore u martay.

Hagahaaga tallaabo-tallaabo ah ku saabsan Is-Baaritaanka DHSC COVID-19 (Baaritaanka Antigen ee Degdegga ah)



Tilmaamahan adeegsiga waxay la xiriiraan Is-Baaritaanka DHSC COVID-19 (Baaritaanka Degdegga ah ee Antigen) oo keliya.

Hagahan wuxuu sharaxayaa sida aad isu baari lahayd ama aad qof kale ka baari lahayd COVID-19, oo aad natiijooyinka ugu gudbiso NHS.

Noocyada luqaddaha kale iyo sharaaxadda fiidiyowga ayaa laga heli karaa:
gov.uk/covid19-self-test-help

Waxaad u baahan tahay inaad sameyso

Hagahaaga tallaabo-tallaabo ah

Akhri tilmaamaha oo raac talaabooyinka sida saxda ah. Baaritaan kasta wuxuu qaadan doonaa ilaa 15 daqiiqo in lasoo diyaariyo natiijooyinkuna waxay diyaar noqon doonaan 30 daqiiqo oo dheeraad ah ka dib.



| Qaybta | Mawduuc | Bogga |
|----------|--|-------|
| 1 | Diyaari aagga baaritaankaaga | 6 |
| | Hubi waxa ku jira xirmada baaritaankaaga | 7 |
| 2 | Diyaari baaritaankaaga | 8 |
| 3 | Qaado muunaddaada suufka ah | 10 |
| | Ma qof kale ayaad baaritaan u samaynaysaa | 11 |
| 4 | Ka shaqeey muunaddaada suufka ah | 12 |
| 5 | Akhri natiijadaada | 14 |
| 6 | Ka warbixi natiijadaada | 15 |
| 7 | Natiijooyinkaaga waxay uga dhigan yihiin | 16 |
| 8 | Waxqabadka baaritaanka | 17 |
| 9 | Si ammaan ah u tuur qalabkaaga baaritaanka | 17 |
| | Qoraal ka samee natiijooyinka baaritaankaaga | 18 |

Qiyaas ahaan marka la eego 3dii qof ee qaba COVID-19 mid kamid ah ma oga inay qabaan.

Is-baaritaanka joogtada ah waxaan ku yareyn karnaa faafitaanka waxaanna gacan ka geysan karnaa ilaalinta kuwa ugu nugul qoysaskeenna iyo bulshooyinkeenna.

Talo ku saabsan qaadashada baaritaanka

Waxaa jira talooyin waxtar leh, ra'yi-bixinta iyo sanduuqyo digniin ah oo ku wada yaalla hagaha, si ay kuu caawiyaan. Adigoo si taxaddar leh tallaabo-tallaabo u raacaya tilmaamahan, waxaad heli doontaa fursad aad u wanaagsan oo aad ku hesho natiijo lagu kalsoonaan karo.

Hagista guud iyo digniinta

- Qof walba u adeegso xirmo baaritaan ah u gaar ah. Waxaad hal mar oo kaliya u isticmaali kartaa shay kasta xirmada baaritaanka.
- Dib ha u isticmaalin walxaha. Waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso natiijada qof walba.
- Haddii aad dhibaatooyin ku qabtid gacmahaaga ama araggaaga, waxaad u baahan kartaa qof kaa caawiya marinta suufka iyo habka baaritaanka.
- Haddii ay sanku ku duran tahay suuf mari sanku kale. Haddii ay labada ku duran yihiin, mid kamid ah giraanta iska bixi intaadan suufka marin.
- Haddii aad sangoror lahayd 24kii saac ee la soo dhaafay, suufka mari sanku kale ama sug 24 saacadood.
- Ha cunin hana cabin ugu yaraan 30 daqiiqo ka hor baaritaanka si aad u yareeyso halista in baaritaanka uu xumaado.
- Qalabyadan waxaa loogu talagalay oo keliya isticmaalka aadanaha.

TALO

Ku keydi qalabka baaritaanka heerkulka qolka ama meel qabow oo qallalan (2°C ilaa 30°C). Ha uga tagin qorraxda tooska ah hana ku keydin tallaajad ama barafeeyaha.

Qalabkan waa in loo isticmaalaa heerkulka qolka (15°C ilaa 30°C). Haddii qalabkan lagu keydiyay meel qabow (wax ka yar 15°C), ku dhaaf heerkulka qolka caadiga ah 30 aqiiqo ka hor intaadan isticmaalin.

Ka fogee qalabka baaritaanka carruurta.

Ku saabsan baaritaankan

Sababta aad isku samayso baaritaanka-shakhsi

Qalabkan baaritaanka-shakhsiyeed waxaa loogu talagalay dadka aan astaamaha lahayn, waa baaritaan suuf ah oo laga qaado sanko iyo cunaha si loo eego in aad cudurka qabtid.

Dadka cudurka qaba oo aan astaamaha lahayn waa kuwa faafiya fayraska laakiin aan muujin wax astaamo ah.

Haddii laga helo COVID-19 waxaad:

- gacan ka geysan kartaa yareynta faafidda cudurka, adiga iyo reerkaaguba waa inaad is-go'doomiyaan oo aad raacdaan tilmaamaha dawladda:
nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/
- kula tali dadka in aad usoo dhowaatay, ama meelaha aad booqatay 14-kii maalmood ee la soo dhaafay, si loo baaro suurtagalnimada infekshanka COVID-19.

Haddii aadan laga helin COVID-19

Waxay u badan tahay in aadan cudurka faafin karin xiliga la qaadayay baaritaanka. Natijada baaritaanka oo caddaynaysaa in aadan cudurka qabin, hase yeeshee, ma dammaanad qaadayso in aadan lahayn coronavirus.


TALO

Haddii aad leedahay calaamadaha coronavirus (COVID-19) ama aad qaadday coronavirus (COVID-19), fadlan eeg hagaha internetka ee NHS:
nhs.uk/conditions/coronavirus-COVID-19

Haddii aad leedahay astaamaha coronavirus (COVID-19) oo xaaladdaadu ka sii darto, ama aad ka soo rayn weydo 7 maalmood ka dib, isticmaal **111** adeega NHS khadka tooska ah: **111.nhs.uk**. Haddii aadan haysan khadka internet ah, wac NHS **111**. Haddii ay jirto xaalad deg deg ah ee caafimaad wac **999**.

**Haka daahin helida caawimaada haddii aad walwalsan tahay.
Ku kalsoonow dareenkaaga.**

Yaa baaritaankan ku habboon



Dadka waaweyn ee jira 18+

Is-baar oo ka warbixi, adigoo haysta caawimaad haddii loo baahdo.



Dhallinyarada da'doodu tahay 12 – 17

Is-baar oo ka warbixi iyadoo uu ku ilaaliyo qof weyni. Qofka weyn ayaa qaban kara baaritaanka marka loo baahdo.



Carruurta ka yar 12 sanno

Carruurta ka yar 12 sanno waa in uu baaro qof wayn.

Ha sameynin baaritaankaan haddii aadan ku kalsoonayn baarista ciyaalka.

Inta jeer oo baaritaanka isku samaysid

Inta jeer ee ay tahay inaad baaritaan isku samaysid way kala duwanaa kartaa iyadoo ku xiran duruufahaaga iyo tilmaamaha hadda jira ee qaranka ama deegaanka.

Halka laga helo taageero dheeraad ah

Ka hel macluumaad badan ee is-baaritaanka halkan:
gov.uk/covid19-self-test-help

1. Diyaari aagga baaritaankaaga




30
daqiiqo

Ha cunin waxna ha cabbin 30 daqiiqo baaritaankaaga ka hor

Waxaad u baahan doontaa:

- Wakhti-tiriyaha sida saacada gacanta ama saacada darbiga
- istiraashooyin
- muraayad
- nadiifiyaha sagxadaha
- gacmaha nadiifiye ama saabuun iyo helitaanka biyo diirran.



1

Si taxaddar leh u akhri tilmaamahan. Waxaad sidoo kale fiidiyowga baaritaanka suufka ka daawan kartaa internetka haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah:

[gov.uk/guidance/covid-19-self-test-help](https://www.gov.uk/guidance/covid-19-self-test-help)



2

Isla markiiba ka hor intaadan bilaabin baaritaanka, masax, nadiifi oo qallaji sagxad siman si aad ugu saarto xirmada baaritaanka.



20
ilbiriqsi


3

Si fiican u dhaq gacmahaaga 20 ilbiriqsi, adigoo isticmaalaya saabuun iyo biyo diirran, ama gacmo nadiifiyaha.


Haddii aad sameyneyso wax ka badan hal baaritaan, nadiifi sagxada oo mar kale dhaq gacmahaaga inta u dhexeysa baaritaan kasta.

Hubi waxa ku jira xirmada baaritaankaaga


4 Xirmada baaritaanka waa inuu lahaadaa:



Haynta tuubada muunadda




Caagadda baaritaanka oo xiran




Bacaha baaritaanka oo xiran



Extraction tube (tuubada loogu talagalay qaadista muunadda)



Bacqashinka



Suuf oo ku jira bac xiran

TALO


Waxa aad samayn lahayd haddii shay waxyeello soo gaarto, jabo ama la waayo

Haddii aad aragto shay waxyeello soo gaartay, jabay ama maqan, fadlan ha isticmaalin xirmada baaritaanka. Waxaad ku bixin kartaa jawaab celin adigoo wacaya xarunta xiriirka macaamiisha.

Khadadka ayaa furan maalin kasta, 7da subaxnimo ilaa 11ka fiidnimo.

Haddii waxyeello kaa soo gaarto aalad soo sheegidda waxay caawin kartaa dadka kale, fadlan tag: [coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk](https://www.coronavirus-yellowcard.mhra.gov.uk)


2. Diyaari baaritaankaaga




- 5 Caagadda baaritaanka ka soo saar bacda xiran ka dib saar sagxad siman oo nadiif ah.

DIGNIIN


Marka la furo, ku billow baaritaanka 30 daqiiqo gudahood.



- 6 Tuubada haynta muunadda saar tuubada ku rakiban kartoona gudihiisa.



- 7 Si taxaddar leh u marooji ama wareeji si aad u furto bacda. Ka fogee wajigaaga markaad furayso oo ka taxaddar inaad daadin wax dareere ah.



- 8 Fur tuubada muunadda oo si tartiib ah u tuuji dhammaan dareeraha ku jira bacda kuna shub tuubada.


Ka taxaddar inaad bacda taabsiin tuubada. Xirmada gali bacda qashinka ee lagu siiyay.



9

Si tartiib tartiib ah ugu duufso istiraasho oo ku tuur qashin qubka xiran.

Haddii aad baaritaanka ka qaadaysid cunuga ka caawi inay duufsadaan. Tani waa si looga hortago duufka farobadan.




20
ilbiriqsi

10

Mar labaad gacmahaaga si fiican ugu dhaq 20 ilbiriqsi adigoo isticmaalaya saabuun iyo biyo diirran ama gacmaha nadiifiye.

Haddii aad qof kale ku samaynayso baaritaankan, labada qof waa inay dib u dhaqaan ama nadiifiyaan gacmahooda.




11

Ka raadi suufka bacda xiran ee hortaada taalla. Raadi caaradda, jilicsan ee marada.

DIGNIIN

Ha taaban caaradda, jilicsan ee marada.



12


Fiiq si aad u furtid baakadda suufka ah markaad diyaar u tahay isticmaalka oo si tartiib ah u soo bixi suufka.

3. Qaado muunaddaada suufka ah

DIGNIIN


Qaybta hore ee suufka ha ku taaban carrabka, ilkaha, dhabannada, cirridka, ama meel kale. Haddii ay taabato wax kale, waxay xumayn kartaa muunaddaada. Waligaa ha ku taaban gacmahaaga caarada jilicsan ee suufka.

Haddii aad baarayso cunug ka yar 12 sano, ama qof u baahan caawimaad, raac tallaabooyinka ku yaal bogga 11




13 Aad u kala fur afkaaga ka dibna ku xoq caaradda suufka labada quman dushooda (ama meeshii ay ahaan jireen).

4 jeer oo si wanaagsan u marmari dhinac kasta (isticmaal toosh ama muraayad kaa caawisa inaad sidaan sameyso). Si taxaddar leh uga saar suufka cunahaaga.



14 Isla suufka si tartiib ah gali 1 dalool sanka gudahiisa illaa aad yara dhibsato (qiyaastii 2.5 sentimitar sankaaga gudahiisa).




15 Si fiican suufka ku wareeji sanka gudahiisa, adigoo sameynaya 10 wareej oo dhammaystiran. Wax xoog ah looma baahna.

Tani waxay keeni kartaa raaxo la'aan. Ha sii gelin suufka gudaha haddii aad yara dhibsanayso ama aad dareemayso xanuun.

Ma qof kale ayaad baaritaan u samaynaysaa


Carruurta 12 jir ka yar waa inuu baaraa qof weyn. Raac hagaha hoose ee ku saabsan sida loo diyaariyo loona baaro ilmaha ama qof u baahan caawin. Waxaad muuqaal sharraxaad ah ka daawan kartaa: [gov.uk/guidance/covid-19-self-test-help](https://www.gov.uk/guidance/covid-19-self-test-help)

Haddii aad baarayso cunug, tus xirmada baaritaanka oo kala hadal waxaad samayn doontid. Haddii ay suurtagal tahay, ku fadhiisi dhabta qofka kale ama qof ha qabto gacantooda. Weydii cunuga inuu istiraashada ku duufsado. Istiraashada ku tuur qashin-qub oo xiran.




- 13** Suufka gacantaada ku hay, u sheeg cunugga inuu aad u kala furo afkooda oo ay madaxooda dib u janjeeri. Si fiican ugu xoq caaradda suufka labada quman dushooda (ama meeshii ay ahaan jireen).

4 jeer oo si wanaagsan u marmari dhinac kasta. Si tartiib leh uga saar suufka.



- 14** Isla caarada suufka si tartiib ah u geli 1 duleedka sankooda ilaa aad ka dareento in ay dhibsanayaan.



- 15** Si tartiib ah oo wareeg ah ugu tirtir suufka gudaha sankooda qaab wareeg ah 10 jeer.

Haddii aadan suufka marinin qumanka, suufka mari labada duleel ee sanka, adigoo duleel kasta ee sanka ku sameynaya 10 wareeg.

4. Ka shaqee muunadda suufka ah

TALO

Si aad u hesho waxtarka ugu fiican, baaritaan ku samee suufka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah ka dib markaad tirtirto sankaga.




15
ilbiriqsi

16

Soo qaado tuubada muunadda oo saar caaradda suufka tuubada muunadda, si ay ugu si jirto dareeraha.

Si xoog leh ugu riix cirifka tuubada muunadda, adigoo ku wareejinaya tuubada 15 ilbiriqsi. Kani waa sida muunaddaada lagu wareejiyo dareeraha.




17

Tuubada ku qabo suufka adigoo ka saaraya.

Hubi in aad dareeraha oo dhan ka saartid caaradda jilicsan ee suufka.

Xirmada gali bacda qashinka ee lagu siiyay.




18

Si adag ugu riix daboolka tuubada muunadda si looga hortago daadin.

TALO

Mar labaad dhaq gacmahaaga markaad dhamayso talaabada ka dib.






19

Hubso in xirmada baaritaanka uu ku yaal meel sagxad oo nadiif ah.


Ha dhaqaajin caagga inta baaritaanka socdo.



20

Si tartiib ah u tuuji tuubada muunadda si aad ugu dhibcisid 2 dhibcood oo dheecaanka ah caagada muunadda (S) ee caagada baaritaanka.

Hubso inaad dareere ku shubaysid oo aadan ku shubaynin xumbo haweed. Ku rid weelka muunad qaadista bacda qashinka iyo suufka.



21

Daar wakhti tiriyaha oo sug 30 daqiiqo ka hor intaadan akhrin natiijadaada.

Natiijo helidda cudurka way soo bixi kartaa wakhti kasta 20 daqiiqo ka dib, hase yeeshe waa inaad sugtaa 30ka daqiiqo oo dhan si aad u diiwaangeliso natiijo taban maadaama diillinta baaritaanka (T) uu ku qaadan karo muddo dheer inuu soo baxo.




Bogga xiga ka raadi sida loo akhriyo loogana warbixiyo natiijadaada.>>

5. Akhri natiijadaada

MUHIIM

Ha u oggolaanin baaritaanka in ay qaadato in ka badan 30 daqiiqo sababto ah tani waxay ka dhigeysaa natiijada mid aan sax ahayn.




Natiijada helidda cudurka

Laba diillin ayaa muuqda. Hal diillin midab leh waa inuu ku jiro aagga diillinta kontoroolka (C), diillinta kalena oo midab leh waa inay ku jirto aagga diillinta baaritaanka (T).

Laba diillin, mid ku xigta C iyo mid ku xigta T, xitaa khadadka daciifka ah, waxay muujinayaan in cudurka lagaa helay.


MUHIIM

Haddii lagaa helo cudurka, adiga iyo reerkaaguba waa inaad is-go'doomisaan oo aad raacdaan tilmaamaha dawladda: [nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/](https://www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/)



Natiijada taban

Hal diillin midab leh waxaa uu ka soo baxaya aagga diillinta kontoroolka (C). Ma jirto wax diillin ah ee ka soo baxda aagga diillinta baaritaanka (T).



Natiijada aan sax ahayn

Diillinta kontoroolka (C) kama soo baxayso.

6. Ka warbixi natiijadaada

Waa inaad NHS u sheegtaa natiijooyinkaaga u helidda cudurka, kuwa taban iyo kuwa aan ansax ahayn.



Diiwaangelinta dhammaan natiijooyinka baaritaanka waxay ka caawineysaa saynisyahannada inay ogaadaan fayrasyada cusub oo dillaaca waxayna kugula talinayaan sida aad uga jawaabi lahayd. Haddii dadku kaliya soo sheegaan natiijo caddaynaysa in ay cudurka qabaan, heerarka kiisaska waxay u muuqdaan kuwo ka sarreeya sida ay dhab ahaan yihiin.

Marka xitaa haddii natiijadaadu ay tahay mid taban ama mid aan xumaatay, waxaad hubin doontaa in macluumaadka NHS uu ahaanayo mid sax ah.

Waxaad u baahantahay koodhka QR, ama nambarka aqoonsiga ee hoostiisa si aad uga warbixiso natiijadaada.



Si toos ah khadka ku gudbi (ugu dhakhsiya badan)

Haddii aad ku nooshahay Ingiriiska, Wales ama Waqooyiga Ireland booqo:

gov.uk/report-covid19-result

Haddii aad ku nooshahay Scotland booqo:

covidtest.scot



Ama telefoon ahaan u gudbi

Wac **119**

Khadaadka ayaa furan maalin kasta, 7da subaxnimo ilaa 11ka fiidnimo, (waxaad si lacag la'aan ah uga wici kartaa telefoonka gacanta ama telefoonka guriga ah)

7. Waxay natiijadaadu ka dhigan tahay

Waxaad kaliya ah dhammaysatay baaritaankaaga markii aad soo sheegto natiijadaada

+ Natiijada helidda cudurka

Haddii natiijada baaritaanku muujiso in aad qabto cudurka, waxay ka dhigan tahay inaad hadda qabtid COVID-19 oo aad halis ugu jirto in aad dadka kale qaadsiiiso. Markii aad soo gudbiso natiijadaada, waxaa lagu siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaabooyinka xiga ee aad qaadi doonto.

DIGNIIN

Adiga, qofkasta oo kula nool, iyo qofkasta oo kugu dhow, waa inuu is-go' doomiya sida wafaaqsan xeerarka qaran iyo kuwa deegaanka oo hada jira, kaas oo laga heli karo www.nhs.uk/conditions/coronavirus-covid-19/self-isolation-and-treatment/

- Natiijada taban

Haddii aad hesho natiijo taban, waxay u badan tahay inaad faafin karin cudurka wakhtiga baaritaanka la qaadayay. Natiijada baaritaanka ee taban, hasee yeeshee, ma dammaanad qaadayso in aadan lahayn COVID-19.

Haddii aan lagaa helin cudurka, waa in aad u sii hogaansanaanto xeerarka qaranka iyo kuwa deegaanka iyo tilmaamaha, oo ay ka mid yihiin gacmo dhaqashada joogtada ah, kala fageynta bulshada iyo xirashada maaskarada, meelaha loo baahan yahay.

Haddii aad isku aragto calaamado heerkul sarreeya, qufac cusub isdaba-joog ah ama lumid ama isbeddel ku dhacay dareenkaaga dhadhanka ama urta adiga iyo reerkaaguba waa inaad is-go' doomisaan oo aad baaritaan kale ka heshaan: gov.uk/get-coronavirus-test ama adigoo xarunta xiriirka macaamiisha ka wacaya **119**. Wicitaannadu way furan yihiin maalin kasta, 7-da subaxnimo ilaa 11-ka habeennimo.



Natijada aan sax ahayn

Haddii aad hesho natijada aan sax ahayn, taas macnaheedu waa baaritaanku si sax ah uma dhicin. Waxaad u baahan tahay inaad baaritaan kale ee nooca dhaqsiya lagu ogaanayo cudurka ka soo saartid xirmada. Waxba dib ha uga isticmaalin baaritaankii hore, ka bilow nidaamka baaritaanka talaabada 1aad.

Haddii cilladu ay sii socoto

Haddii cilladu ay sii socoto, jooji isticmaalka xirmadka baaritaanka isla markiiba. Haddii aadan haysan baaritaan kale oo aad heli karto, waxaad app-ka NHS COVID-19 ka qaadan kartaa nooc kale oo baaritaan ah ama adigoo booqanaya:

[gov.uk/get-coronavirus-test](https://www.gov.uk/get-coronavirus-test) ama adigoo xarunta xiriirka macaamiisha ka wacaya **119**. Wicitaannadu way furan yihiin maalin kasta, 7-da subaxnimo ilaa 11-ka habeennimo.

8 Waxqabadka baaritaanka

Baaritaanku waxay u badan tahay inuu soo saaro inaad cudurka qabtid haddii uu qofka leeyahay heerar coronavirus oo sarreeya (COVID-19).

Tani waxay ka dhigan tahay inay u badan tahay in la ogaado dadka hadda cudurka faafin kara oo u baahan in isla markiiba ay is-karantiilaan.

9 Si ammaan ah u tuur qalabkaaga baaritaanka



Markuu baaritaankaagu dhammaado, ku rid dhammaan xirmooyinka baaritaanka ee la isticmaalay bacda qashinka lagu siiyay oo ku rid qashinkaaga guud ee guriga.

Si fiican u dhaq gacmahaaga ka dib marka qashinka ku tuurto.

Qoraal ka samee natiijooyinka baaritaankaaga

Tan waxaa loogu talagalay xasuustada. Waa inaad wali u soo sheegtaa natiijadaada NHS (wixii macluumaad ah eeg bogga 15).

Booqo: gov.uk/report-covid19-result



| Yaa qaadday baaritaanka | Taariikh | Wakhtiga | Natiijada baaritaanka |
|-------------------------|----------|----------|-----------------------|
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |
| | | | |

Qalabkaaga wuxuu ka kooban yahay agabyadan soo socda

| Walxaha | 3-Xirmo | 7-Xirmo |
|---|---------------------------|---------------------------|
| Tilmaamaha isticmaalka (dukumeentigan) | 1 | 1 |
| Sanduuq leh fadhiga tuubada haya | 1 | 1 |
| Caagadda muunadda oo kujira xirmo xiran | 3 | 7 |
| Bacaha baaritaanka oo xiran | 3 | 7 |
| Fadhiga tuubada muunadda | 3 | 7 |
| Suuf oo ku jira bac xiran | 3 | 7 |
| Bacda qashinka | 3 | 7 |
| | Koodhka alaabta TK2196 | Koodhka alaabta TK2193 |

Bixinta qalabkan waxaa kaliya loo oggol yahay inay qayb ka tahay hawlgalinta DHSC ee hoos timaadda barnaamijka NHS Test and Trace.



Soo-saaraha: Department of Health and Social Care, 39 Victoria Street, Westminster, London, SW1 0EU.

Lagu soo saaray qandaraaska DHSC waxaana soo saaray: Xiamen Biotime Biotechnology Co Ltd, 2F/3F/4F, No. 188, Pingcheng South Road, Haicang Street, Haicang District, Xiamen, Fujian, 361026, P. R. China.

Tusmada astaamaha



Ku keydi heerkulka 2 – 30°C



Lagu nadiifiyay ethylene oxide



Soo-saaraha



Waxay ka kooban tahay baaritaannada ku filan xx



Nambarka xirmada



Ku isticmaal ugu dambaynta



Aaladda ogaanshaha caafimaadka ee In vitro



Ha isticmaalin haddii xirmadu waxyeellowday



Ka ilaali qorraxda



Taariikhda soo-saarista



Dib ha u isticmaalin



Dib loo warshadayn karo



Meel qallalan dhig



La tasho tilmaamaha isticmaalka



Digniin

Dhammaan macluumaadka iyo sawirrada ku jira dukumentigan waa sax ilaa 18ka Juun 2021. Nooca 1.3.4